



## Macluumaadka asaasiga ah ee ku saabsan talaalka Koronafayras

Waxaan kugula talinaynaa inaad qaadato talaal si aad u ilaaliso naftaada iyo tan  
qoyskaaga!

Halkee ayaad ka qaadnaynaa talaalka?



Waxaad ku nooshahay hoyga LAF  
Dakhtarka ayaa imaan doono hoyga si uu u talaalo dadka halkaas jooga.  
Talaalalka la isticmaalayo waa BioNTech.

Talaal qaadashada waa iskaa ama ikhtiyaar.



Waxaad go'aansan kartaa:  
ma rabaa inaan qaato talaalka? ama maya?

Talaal-qaadashada waa mid bilaash ah.



Uma baahnid inaad lacag bixiso si lagu talaalo.



Ilmaha iyo dadka ka yar illaa da'da 15-ka sano.



Haweenka uurka leh



Qof kasta oo qaba qandho.  
Qof kasta oo xasaasiyad ku leh talaalka.  
Xasaasiyad waxaa loola jeedaa  
inaadan u dulqaadan karin waxyaabo qaar.



Haddii aad qabtay caabuqa Koronafayras.  
Markaa wali waad bedbaadsan tahay hada oo waxaad kali ah u baahan  
tahay inaad qaadato 1 dhoos oo talaalka ah goor dambe.  
Dhakhtarka wuxuu sheegi doonaa goorta aad qaadnayso dhooska ama  
qiyaasta talaalka.

Kumaa qaadnaynin talaalka?

Nuxurka ku jira daabacadaan LAF waxay ku salaysan tahay macluumaadka ay nasiisay Machadka Robert Koch (RKI) ee Berlin iyagoo la kaashanayo Charité –Universitätsmedizin Berlin, rugta caafimaadka galmada ee Friedrichshain-Kreuzberg, Xaruunta Qorshaynta Qoyska ee Berlin e.V.- BALANCE iyo Xafiiska Iskuduwaha iyo Maaraynta Qaxootiga ee Waaxda Golaha-guurtida ee loogu talo-galay Is-dhexgalka, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.



# Macluumaadka asaasiga ah ee ku saabsan talaalka Koronafayras

Ka hor inta aadan qaadan talaalka, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga:



- haddii aad horay u qabtay caabuqa koronafayras
- haddii aad waligaa xanuun ku dareentay goobta dhakhtarka,



- haddii aad waligaa suuxday irbad lagu duray awgeed,
- haddii aad waligaa si xun uga falcelisay talaalka.



- haddii aad qaadatay talaal kale labadii usbuuc ee lasoo dhaafay.



- haddii aad qabto xasaasiyad.  
Xasaasiyad waxaa loola jeedaa inaad u dulqaadan karin waxyaabo qaar.

## Talaalka kadib:



Dadka badi way u dulqaataan talaalka si wanaagsan.

Talaalka waa wadada kusoo noqoshada nololaha caadiga ah.

Tusaale ahaan: buuqashooyinka, koorsooyinka luuqadaha, iskuulka ama shaqada.

Waxaad mar kale aadi kartaa dukaamaysi adigoo lagaa qaadin baaritaan.



Dadka qaar ayaa dareema saamayn fudud ee talaalka marka la talaalo kadib.

Waxay dareemaan xanuun.

Ama ma dareemayaan caafimaad.

Saamaynta talaalka waa inaysan dabo-dheeraan.



Ma dareemaysaa xanuun marka lagu talaalo kadib?

Ma dareentaa caafimaad darro marka lagu talaalo kadib?

U sheeg shaqaalaha hoyga.

Shaqaalaha ayaa waydiin doono dhakhtarka.

Dhakhtarka ayaa kuu sheegi doono waxa la samaynaayo.



Nuxurka ku jira daabacadaan LAF waxay ku salaysan tahay macluumaadka ay nasiisay Machadka Robert Koch (RKI) ee Berlin iyagoo la kaashanaayo Charité –Universitätsmedizin Berlin, rugta caafimaadka galmada ee Friedrichshain-Kreuzberg, Xaruunta Qorshaynta Qoyska ee Berlin e.V.- BALANCE iyo Xafiiska Iskuduwaha iyo Maaraynta Qaxootiga ee Waaxda Golaha-guurtida ee loogu talo-galay Is-dhexgalka, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.